

Is Diiwaangelinta

- Waxaa telefoon kuu soo diraya xafiiska diiwaan gelinta, si ay u dhameystiraan is diiwaan gelinta oo ay taas u dajajiso baaritaanka marka aad isbitaalka timaado.

Jadwalka

- Haddii aad dooneyso **inaad joojiso ama aad dib u dhigato ballantaada, fadlan naga soo wac 320-229-4933 oo dooro dookhyada dib u dhigashada ballanta**. Xafiiska balamada waxa uu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.
- Haddii aadan ku imaan karin balanta, waxaanu kaa codsaneynaa in aan na soo wargeliso 48 saac ka hor.

Telefoonka balanta dhakhtarka ka horeeya

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya 5-7 maalmood kahor balanta baaritaanka. Waxa ay su'aalo kaa weydiinayaan waxyaabaha kaa caawin kara u diyaargarowga baaritaanka, waxayna kaala hadlayaan caafimaadkaaga, kaana caawinayaan in aad fahamto daawooyinka aad qaadan karto iyo kuwa aadan qaadan karin ka hor baaritaanka.
- Haddii aad WAX su'aal ka qabto tilmaamaha baaritaanka, fadlan soo wac telefoon lambarada ku qoran warqadaada xaqijintaa ballanta, Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.

Baaritaanka ka hor

- La xiriir shirkada ceymiskaaga si aad u hubiso inay bixinayaan kharashka baaritaanka. Lambarka taleefoonku wuxuu ku yaalaa dhinaca dambe ee kaarkaaga caymiska.

Macluumaadka Darawalka

- Waa inuu kula socdaa darawal gaari oo da'diisu tahay 18 ama ka weyn marka aad dhakhtarka timaado. Haddii aadan heysan darawal gaari, waxaa laga yaabaa inaan balantaada dib loo qaban.
- Laguuma **oggola** inaad adigu gaariga wadato. Laguuma **ogola** in aad gaari wado, tagsi ama bas aad raacd, ama ka tagto kaligaa Qeybta Baaritaanka jirka kaligaa.
- Taksi waad u qaadan kartaa guriga iyada oo **qof weyn** oo mas'uul ah kula socdo.
- Haddii aadan heli karin **qof gaariga kugu wada oo mas'uul ah** (qof qoyska ka tirsan ama saxiib) oo guriga ku geeyaa, baaritaankaaga waxaa la sameynayaan iyada oo aan lagu suuxin ama balanta dib ayaa loo dhigi doonaa.
- Waxaan si adag kugula talineynaa in qof kula joogo 24 saac kadib baaritaanka sababtoo ah daawada suuxinta ayaa jirkaaga saameyn ku yeelan karta, xusuustaada, iyo sida aad u gaari karto go'aan wanaagsan, oo amaan ah.
- Laguuma **ogola** in aad shaqada ku noqoto, gaari waddo, ama makiinado ku shaqeysyo maalinta baaritaanka. Ha cabin khamri hana saxiixin wax qoraal ah oo sharci ah 24 saac kadib suuxdinta.
- Ka hor inta aadan ka tagin goobta baaritaanka, calaamadaha aasaasiga ah ee jirka waa inay noqdaan kuwo caadi ah.

Fariin/Tilmaamo gaar ah: